**DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA**

# Xeer-nidaamiyaha 14aad ee Guddiga Shaqaalaha

# Kharashaadka Safarka iyo Gunnooyinka La Xiriira Safarka

**Tusmo**

***1. Hordhac*** **...... *3***
**1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda ...... 3**
**1.2. Mabaa'diida Hagaya ...... 3**
**1.3. Cidda lagu maamulayo ...... 4**
**1.4. Erey-bixinta ...... 4**
***2. Kharashaadka Tooska ah ee Safarka*** **...... *6***
***3. Gunnooyinka La Xiriira Safarka*** **...... *6***
***4. Ansaxinta Gunnooyinka La Xiriira Safarka*** **...... *7***
***5. Cabashooyinka iyo Rafcaannada*** **...... *9***
***6. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha*** **...... *9***
**Lifaaqa 1aad: Shaxda Habeen-dhaxa – Safarka Gudaha & Kan Dibadda ...... 10**

# 1. Hordhac

## 1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda

1.1.1. Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 33[aad], Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017[ka] ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.1.2. Xeer-nidaamiyahan waa “xeer la diidi karo” sida loogu qeexay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo si waafaqsan Qodobka 33aad, Faqradda 33.1, iyada oo muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu Baarlamaanku u haysto in si uu dib-u-eegis ugu sameeyo.

1.1.3. Xeer-nidaamiyahan waxaa uu abuurayaa habraac loo bixiyo kharashaadka la xiriira safarka, oo halkan loogu qeexay Kharashaadka Tooska ah ee Safarka iyo Gunnooyinka La Xiriira Safarka, ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda inta ay ka maqan yihiin xarunta ay caadi ahaaka shaqeeyaan si ay shaqo ugu soo qabtaan Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.1.4. Maaliyadda Kharashaadka Tooska ah ee Safarka iyo Gunnooyinka La Xiriira Safarka ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in laga bixiyaa Miisaaniyadda Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.1.5. Xaq u lahaanshaha in dhammaan Kharashaadka Tooska ah ee Safarka iyo Gunnooyinka La Xiriira Safarka ay bixiso Wasaaradda Maaliyadda waxaa ay u baahan tahay in qofka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ka tirsan uu buuxiyo foomamka loo baahan yahay ee lagu qeexay Tilmaan gaar ah, oo la soo saaro iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 33ad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

1.1.6. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa dhammaan hay’adaha (wakaaladaha) iyo mu’asasooyinka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ee lagu qeexay Qaybta 1aad, Faqradda 3aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2017 ee maaliyadda ka hela sanduuqa maaliyadda mideysan.

1.1.7. Gunnooyinka La Xiriira Safarka waa kuwo dib-u-eegis iyo wax-ka-beddel joogto ah lagu sameeyo.

## 1.2. Mabaa’diida Hagaya

1.2.1. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa hagaya mabaa’diida naxariista, daah-furnaanta, bulsho-u-adeegga, iyo ixtiraamidda ku kala-dambeynta maamulka, daacadnimada, sirnimada, anshax hawleed, hufnaanta, waxtarka, xirfadlenimo, xaq ku shaqeyn, sinnaan iyo hababka ugu wanaagsan ee hawlqabadka.

1.2.2. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay mabaa’diidan ku saleeyaan la-dhaqankooda marka ay la tacaamulayaan saraakiisha la soo

doortey, Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee ay wada shaqeeyaan, iyo dadweynaha.

1.2.3. Saraakiisha la soo doorto waa in ay mabaa'diidan ku saleeyaan la-dhaqankooda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

1.2.4. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa shaqaaleyntooda ku saleysan tahay aqoontooda iyo kartidooda ka dib marka ay ka soo baxaan habraacyada soo-xulidda ee uu dhigayo sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaasha iyo dhabbe-tuseyaasha la xiriira.

1.3. Cidda lagu maamulayo

1.3.1. Marka laga reebo sida hoos lagu cayimey, Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maamulka iyo maareynta ee waqti buuxa iyo kuwa waqti gaaban shaqeeya ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya oo mushaarkooda laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan.

1.3.2. Xeer-nidaamiyahan waxaa sidoo kale lagu maamulayaa shaqaalaha loo magacaabey jagooyin ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maaliyaddoodu ay bixiyaan deeq-bixiyeyaal, sida ku xusan Qodobka 22$^{aad}$ ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

1.3.3. Xeer-nidaamiyahan laguma maamulayo:

a) Xubnaha ka tirsan ciidamada booliska, ciidamada amniga, ciidamada qalabka sida
b) Xubnaha garsoorka
c) Saraakiisha la doorto
d) Wasiirrada, Wasiir-ku-xigeennada iyo xubnaha Golayaasha ama Guddiyada uu magacaabo Madaxweynaha
e) Shaqaalaha sharikaadka ganacsi ee ay dowladdu leedahay oo u shaqeeya qaab ganacsi
f) Shaqaalaha loo qorto Qandaraasyo Muddo Go'an socda si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed kuwaas oo ah kuwo gaar ah oo ka madax-bannaan hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
g) Shaqaalaha u shaqeeya qandaraasle ay dowladdu u qaadatey in uu bixiyo adeegyo.

1.4. Erey-bixinta

1.4.1. Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, fasiraadahan soo socda ayaa la raacayaa;

a) ***"Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland sida uu dhigeyo Qodobka 4aad, Faqradda 4.1(e) ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

b) ***"Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si

waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixin ee Dowladda.

c) ***"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

d) *"**Kharashaadka Tooska ah ee Safarka**"*waxaa lagu qeexay kharashka dhab ahaan ku baxa in meel laga safro oo meel ama meelo kale la tago, taas oo macnaheedu yahay kharashka dhab ahaan ku baxa safarka hawada, badda ama dhulka la marayo.

e) ***"Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon

f) ***"Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan oo Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

g) ***"Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

h) ***"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaalka gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo.

i) ***"Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan ay tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo.

j) ***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhisey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

k) ***"Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerkan. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka.

l) *"**Gunnooyinka La Xiriira Safarka**"*waa kharashka jiifka iyo habeen-dhaxa qofka inta uu ka maqan yahay goobta ay ku taallo xarunta shaqada ee caadiga ah.

# 2. Kharashaadka Tooska ah ee Safarka

2.1. Iyada oo la raacayo Qodobka 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo faqradda 1.1.3 ee kore, Kharashaadka Tooska ah ee Safarka waa kharashka dhab ahaan ku baxa in meel laga safro oo meel ama meelo kale la tago. Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ayaa bixinaya kharashka dhabta ah ee safarka ee ay qaansheeg ku soo gudbiso cidda bixineysa adeegga gaadiidka (hawada, badda ama dhulka). Qiimaha Kharashka Tooska ah ee Safarka waxaa lagu qeexaa in uu yahay kan caadiga ah ee loo yaqaanno *economy class* ee ay ay qaadato cidda bixineysa adeegga gaadiidka, haddii uu yahay gaadiidka hawada, dhulka ama kan baddaba.

2.2. Safarka darajada koowaad oo loo yaqaanno *business* ama *first-class* waqtigan la joogo ma aha mid kharashkiisa la bixinayo; haseyeeshee, qofka ka tirsan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda waxaa uu xor u yahay in uu tikidhka heerka caadiga ah ee la siiyo uu jeebkiisa ka kabo si uu heerka tikidhka kor ugu qaado. Kharashka ku baxa kor-u-qaadidda heerka tikidhka ee dheeriga ka ah kharashka tikidhka caadiga ah qofka shaqaalaha ahma soo weydiisan karo in loo soo celiyo.

2.3. Lacagta Kharashka Tooska ah ee Safarka ee la siinayo cidda bixineysa adeegga gaadiidka waxaa la bixinayaa keliya marka si sax ah loo soo buuxiyo oo lana soo ansaxiyo **Foomka Codsiga Lacagta Hormariska ah ee Safarka** (eeg Foomka 1aad ee Safarka ee la socda Tilmaanta M ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda).

2.4. Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-gobolkeedka Jubbaland ee Soomaaliya waxaa ay ku dadaaleysaa in dhammaan Kharashaadka Tooska ah ee Safarka iyada oo ka wakiil ah Qofka Ka Tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ay toos u siiso cidda bixineysa adeegga gaadiidka. Marka aaney tani suuragal ahayn sababtuna ay tahay in aan la hayn waqti dad ku filan oo lagu hormariyo lacagta safarka, Qofka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ah ayaa jeebkiisa ka bixinaya Kharashka Safarka ee Tooska ah waxaana uu codsanayaa in loo soo celiyo lacagtiisa marka uu ku soo noqdo xaruntiisii shaqada ee caadiga ah isaga oo **buuxinaya Foomka Dalbashada Kharashaadka Safarka iyo Kharashaadka Kale** (eeg Foomka 3aad ee Safarka ee la socda Tilmaanta M ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda) haddii aanu jirin qaab kale oo lagula heshiin karo cidda bixineysa adeegga gaadiidka.

2.5. Kharashaadka Safarka ee Tooska ah ee laga yaabo in la galo inta laga maqan yahay xarunta goobta shaqada oo Wasaaradda Maaliyaddu bixin karin ka hor inta aanu Xubinta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ka tirsan ka tegin xarunta uu si joogto ah uga shaqeeyo, Qofka Shaqaalaha ah waxaa uu xaq u leeyahay in uu codsado lacag hormaris ah oo ah qiyaasta kharashka ku baxaysa ee ah Kharashaadka Safarka ee Tooska ah isaga oo adeegsanaya **Foomka Codsiga Lacagta Horimariska ah ee Safarka** (eeg Foomka 1aad ee Safarka ee la socda Tilmaanta M ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda).

# 3. Gunnooyinka La Xiriira Safarka

3.1. Iyada oo la raacayo Qodobka 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo faqradda 1.1.3 ee kore, Gunnooyinka

Safarka La Xiriira waa kharashka jiifka iyo habeen-dhaxa qofka inta uu ka maqan yahay goobta ay ku taallo xarunta shaqada ee caadiga ah.

3.2. Gunnooyinka Safarka La Xiriira waxaa la hormarinayaa keliya marka si sax ah loo buuxiyo loona oggolaado **Foomka Codsiga Lacagta Hormariska ah ee Safarka** (eeg Foomka 1aad ee Safarka ee la socda Tilmaanta M ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda)

3.3. Wasaaradda Maaliyaddu waxaa ay bixineysaa keliya lacagta dhab ahaan ku baxdey jiifka, oo la soo raaciyey qaan-sheegad rasmi ah oo ka timid cidda bixisey adeegga jiifka marka lagu xisaabtamo gunnada jiifka (faqradda 4.4 ka eeg munaaqasho la xiriirta shuruudaha ku soo xisaabtamidda). Haddii aan la haynin dokumenti rasmi ah oo kaaba/daliil u noqda kharashka waxaa taasi ka dhalaneysa in kharashka uu noqdo mid aan sharci u haysan in lagu xisaabtamo

3.4. Lacagta habeen-dhaxa ah waxaa lagu xisaabinayaa heer qiyaas loo dejiyey maalintii. Looma baahna dokumenti qaansheeg ah marba haddii la xisaabiyo gunnada habeen-dhaxa ah laakiin waxa ay ku xiran tahay oo keliya tirada maalmaha laga maqnaadey xarunta shaqada ee joogtada ah. Noocyada heerarka habeen-dhaxa ee safarrada gudaha dalka iyo kuwa dibadda waxaa lagu faahfaahiyey **Lifaaqa 1aad** ee Xeer-nidaamiyahan.

# 4. Ansaxinta Gunnooyinka La Xiriira Safarka

4.1. Iyada oo la raacayo faqradda 20.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo faqradda 1.1.3 ee kore, faqradahan soo socda ayaa tibaaxaya habraacyada ay tahay in la raaco marka la soo codsanayo oo xaqna loo yeelanayo helidda iyo/ama soo sheegashada Kharashaadka Safarka iyo Gunnooyinka La Xiriira Safarka oo la halmaala safar hawl dowladeed oo rasmi ah oo ka baxsan xarunta uu ka shaqeeyo Qofka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

4.2. Dhammaan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay buuxiyaan **Foomka Codsiga Lacagta Hormariska ah ee Safarka** (eeg Foomka 1aad ee Safarka ee la socda Tilmaanta M ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waana in oggolaanshaha loo baahan yahay ay ka helaan wasaaraddooda si loo bilaabo geeddi-socodka tigidhada Safarka Tooska ah loogu iibinayo, ka hor safarka. Taariikhaha safarka ee ku qoran Foomka 1aad ee Safarka ayaa sal looga dhigayaa in Wasaaradda Maaliyaddu tigidho u soo iibiso Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Oggolaanshaha u habboon waxaa lagu sheegey foomka. Wasaaradda Maaliyadda ayaa diyaarineysa habraacyo la isku og yahay oo kala dhexeeyakuwa bixiya adeegyada gaadiidka si ay uga soo iibsato tigidhada ayna u hormariso kharashka safarka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Habraacyadan la isku ogyahay waxaa ka mid ahaan doona waqtiga ugu yar ee Wasaaradda Maaliyaddu ugu baahan tahay in Codsiga Lacagta Hormariska ee Safarka la soo gaarsiiyo xafiiskooda ka hor inta aan loo bixin safarka rasmiga ah si loo hubiyo in tikidhada laga soo iibsado kuwa bixiya adeegga gaadiidka oo gunnadana loogu diyaariyo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

4.3. Codsiga Lacagta Hormariska ah ee Safarka ee la ansaxiyey waa in loo geeyo qaybta ama waaxda ay Wasaaradda Maaliyadu u sameyssey in ay qabanqaabiso soo iibsashada tigidhada safarka iyo bixinta Gunnooyinka La Xiriira Safarka. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee safraya ayaa ay Wasaaradda Maaliyaddu

ay ogeysiineysaa marka lacagtooda hormariska ah lagu shubayo xisaabtooda bankiga.

4.4. Muddo 14 maalmood gudahooda ah, marka uu ku soo noqdo xarunta caadiga ah ee shaqada, Shaqaalaha Rayida ee Dowladda waa in uu si rasmi ah ugu soo xisaabtamaa Gunnada La Xiriirta Safarka isaga oo adeegsanaya **Foomka Ku soo xisaabtamidda Lacagta Hormariska ah ee Safarka** (eeg Foomka 2aad ee Safarka ee la socda Tilmaanta M ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda). Haddii aan lagu soo xisaabtamin gunno horey loo bixiyey waxaa ay taasi sababeysaa in Shaqaalahaa Rayidka ah ee Dowladda uusan xaq u yeelan in uu helo gunnooyin kale ilaa uu ka soo xisaabiyo gunnada hore ee taagan. Wasaaradda Maaliyadda ayaa yeelan doonta nidaam lagu raad-raaco dhammaan bixinta iyo ku soo xisaabtamidda gunnooyinka ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

4.5. Ku xisaabtamidda Kharashaadka Tooska ah ee Safarka ee la xiriira tikidh-dayiiradeed iyada oo la adeegsanayo **Foomka Ku xisaabtamiddaLacagta Hormariska ah ee Safarka** (eeg Foomka 2aad ee Safarka ee la socda Tilmaanta M ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in uu keenaa waraaqaha diyaaradda lagu raaco ee loo yaqaanno (*boarding pass*) oo tilmaamaya goorta uu Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu uu ka safrey iyo goorta uu ku soo laabtey xaruntiisa caadiga ah ee shaqada. Haddii aan la haynin waraaqahaas *boarding pass* la yiraahdo, haddii ay dhacdo in ay lumaan ama aaney diyaaraddu bixinin, marka safarku uu yahay mid caalami ah Qofka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ka tirsan waxaa uu keenayaa nuqullada bogagga baasaboorkooda ee laga shaabadeeyey ee tilmaamaya waqtiga ay safreen iyo waqtiga ay ku soo noqdeen xaruntooda shaqada.

4.6. Dhammaan lacagta horey loo dhiibey ee dib loo soo celiyo marka lagu xisaabtamo Gunnooyinka Safarka La Xiriira waa in risiidh tilmaamaya in ay heshey ay ka bixisaa Wasaaradda Maaliyadda waana in la geliyaa Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda.

4.7. Haddii lagu khasbanaado in qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed uu si degdeg ah u safro oo aan la haynin waqti ku filan oo Wasaaradda Maaliyadda ay ku soo iibiso tigidh ayna ku siiso Gunnooyinka La Xiriira Safarka, Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa ay isticmaalayaan lacagtooda waxaana ay soo codsanayaan in loo soo celiyo kharashkii ka baxay iyaga oo adeegsanaya **Foomka Dalbashada Soo Celinta Kharashaadka Safarka & Kharashaadka kale**(eeg Foomka 3aad ee Safarka ee la socda Tilmaanta M ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda) marka ay ku soo noqdaan goobta caadiga ah ee ay ka shaqeeyaan.

4.8. Mararka ay jiraan safarro karashaadkooda dibadda laga bixiyo oo looga qaybgelayo koorsooyin, shirar ama kulamo (sida, marka deeq-bixiye ama hay’ad ay bixinayaan kharashaadka tikidhka, jiifka, gunnada habeen-dhaxa iyo kharashaadka kale), Qofka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda xaq uma laha in uu dalbado Gunnooyinka Safarka La Xiriira ee safarkaas.

4.9. Haddii safar gudaha ama mid dibadeed, oo la ansaxiyey oo lacagtiisana la bixiyey laga noqdo, dhammaan Gunnooyinka Safarka La Xiriira ee la heley (habeen-dhaxa, gunnooyinka kale ee ay xeerarku oggol yihiin) waa in Wasaaradda

Maaliyadda loogu soo celiyaa muddo 7 maalmood ah oo ka bilaabata taariikhda laga noqdey (la kansaley) safarka.

## 5. Cabashooyinka iyo Rafcaannada

5.1. Qofka shaqaalaha ka tirsan ee aan ku qancin go'aan ay ka qaadatey Hay'adda uu u Shaqeeyo oo la xiriira arrimo ku saabsan shaqaalenimada qofka, ama amar ay siiyeen Maareeye ama Hay'ad Loo Shaqeeyo, waxaa uu Guddiga ka codsan karaa in uu baaro arrintan. Xubnaha Guddiga ayaa dhisaya Guddi Rafcaanno oo madax-bannaan oo eega kiiska oo ka soo bixiya fikir taageeraya Hay'adda Loo Shaqeeyo ama mid taageeraya Qofka Shaqaalaha ah. Haddii ay ku habboon tahay Guddigu waxaa uu cayimayaa tallaabo ay tahay in ay qaaddo Hay'adda Loo Shaqeeyo si ay wax uga qabato cabashada.

## 6. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha

6.1. Anniga oo adeegsanaya awoodaha ka Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland la igu siiyey Madaxa V, Qodobka 19aad, Faqradda 19.1 ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo Madaxa VIII, Qaybta 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, waxaan soo saarey Xeer-nidaamiyahan oo dhaqangelaya taariikhdan soo socota.



Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

## LIFAAQA 1AAD: SHAXDA HABEEN-DHAXA – SAFARKA GUDAHA & KAN DIBADDA

Safar Caalamiga ah (Nairobi)

| **Xaalad** | **Habeen-dhax (USD)** |
|---|---|
| Jiifka iyo cuntada laga wada bixinayo | $25 |
| Jiif/Quraac/Qado laga bixinayo | $50 |
| Jiif/Quraac/Casho laga bixinayo | $50 |
| Jiifka/Quraac laga bixinayo | $70 |
| Jiif oo keliya laga bixinayo | $80 |
| Haddii Jiif, Quraac, Qado iyo Casho aan laga bixineynin | $150 |

Soomaaliya:Dhammaan magaalooyinka aan ka ahyn Muqdisho/Hargeysa

| **Xaalad** | **Habeen-dhax (USD)** |
|---|---|
| Jiifka iyo cuntada laga wada bixinayo | $20 |
| Jiif/Quraac/Qado laga bixinayo | $35 |
| Jiif/Quraac/Casho laga bixinayo | $35 |
| Jiifka/Quraac laga bixinayo | $55 |
| Jiif oo keliya laga bixinayo | $65 |
| Haddii Jiif, Quraac, Qado iyo Casho aan laga bixineynin | $100 |

Soomaaliya: Muqdisho/Hargeysa

| **Xaalad** | **Habeen-dhax (USD)** |
|---|---|
| Jiifka iyo cuntada laga wada bixinayo | $25 |
| Jiif/Quraac/Qado laga bixinayo | $50 |
| Jiif/Quraac/Casho laga bixinayo | $50 |
| Jiifka/Quraac laga bixinayo | $70 |
| Jiif oo keliya laga bixinayo | $80 |
| Haddii Jiif, Quraac, Qado iyo Casho aan laga bixineynin | $150 |